



TOGETHER WE DO  
THE COMMUNITY  
JUSTICE

## Xuquuqdaada haddii Ingiriisigu uusan ahayn Luqaddaada Koowaad: Dugsiga Cunuggaaga iyo COVID-19

Dhismayaasha dugsigu way xiran yihiin inta ka hartay sanad dugsiyeedka iyada oo ay ugu wacan tahay COVID-19. Waxaa laga yaabaa inaad la yaaban tahay waxaad ka filii karto dugsiga cunuggaaga si aad uga caawiso cunuggaaga sii wadidda barashada luuqada Ingiriisiga iyo sameynta shaqada dugsiga.

- » Caruurta aqoontooda luuqada Ingiriisiga ay hooseysa ayaa leh xuquuqyo.
- » Xaq ayay u leeyahiin inay iska diiwaangeliyaan dugsiga dadweynaha ee deegaanka.
- » Xaq ayay u leeyahiin inay bartaan luuqada Ingiriisiga. e droit d'apprendre l'anglais.
- » Xaq ayay u leeyahiin inay kala qeybqaataan asxaabta akadeemiyadaha, oo leh caawimaad dheeri ah ama isbedelo dhanka shaqada si ay wax uga bartaan.
- » Waaliddiinta aqoontooda luuqada Ingiriisiga ay hooseysa ayaa sidoo kale xaq u leh inay dugsiga kula xiriiraan luqad ay fahmi karaan.
- » Xuquuqahan loogu talagalay waaliddiinta iyo carruurta ayaa sii soconaysa inta dhismayaasha dugsigu xiran yihiin sannad dugsiyeedka.

Macallimiinta iyo dugsiyada canuggaaga waa inay la shaqeeyaan adiga iyo cunuggaagaba kugulana xiriiraan luqad aad fahmi karto. La xiriiridda dugsiga degmadaada iyo macallimiintaada way kala duwanaa karaan. Waxay u badan tahay in lagu sameeyo wicitaan taleefan, qoraal, barnaamijyada sida TalkingPoints, kulan fiidiyow ah, fasalada onlaynka ah, ama teknolojiyad kale.

### **Waa kuwaan tusaalooyin kusaabsan macluumaadka ah ay tahay in dugsigu ku bixiyo luqaddaada koowaad:**

- » Macluumaad ku saabsan xiridda ama dib-u-furida dhismayaasha dugsiga
- » Sida dugsiga u sinayo cunuggaaga shaqada dugsiga (onlayn/waraaqaha/wicitaanada taleefanka/iwm.)
- » Ka caawinta cunuggaaga inuu fahmo tilmaamaha shaqada dugsiga
- » Darajooyinka iyo kaararka Warbixinta
- » Macluumaadka ku saabsan barnaamijka Cunuggaaga ee Bartaha Ingiriisiga
- » Haddii dugsigu uu bixinayo quraac ama qado, sida cuntada loo helo
- » Kahortagyada Caafimaadka ee kusaabsan COVID-19

## Halkan waxaa ah qaabab aad u hadli karto si aad uga caawiso waxbarashada cunuggaaga inta lagu gudajiro xiritaanka dhismaha dugsiga.

- » Weydiiso macallinka ama dugsiga cunuggaaga inuu kuu waco turjubaan markii aad soo waceysid. Dugsiyadu waa inay bixiyaan turjubaano aqoon leh.
- » U sheeg ESL/ESOL-ka cunuggaaga iyo macallimiinta fasalka kale haddii aad jeceshahay wicitaan taleefan ama qoraal ama barnaamijyada aad isticmaaleyso.
- » Weydiiso macluumaadka xiriirka macallinka (taleefoon/imayl/barnaamijka layskalasoo xiriiro) si cunuggaagu u weydiisto kaalmo
- » Weydii sida dugsiga Degmadu uu u qorsheynayo inuu ka caawiyo cunuggaaga sii wadidda barashada luuqada Ingiriisiga.
- » Weydiiso tilmaamo ah fiidiyow haddii aad haysatid telifoon casri ah ama kombiyuutar.
- » Weydiiso haddii dugsiyada kaa caawin karo internetka haddii aadan haysanin.
- » Weydiiso haddii dugsiyada kaa caawin karo kombiyuuter ama aalad haddii uusan cunuggaagu lahayn mid.
- » Wac Isku-Duwaha Bartaha Af Ingiriisiga Degmadda ee dugsigaaga ama Isku-duwaha ESL haddii aadan kahelin jawaab macallimiinta. Inta badan waxaad ka heli kartaa macluumaadka xiriirkakooda bogga internetka ee dugsiga.
- » Ka wac Ohio Department of Education Lau Resource Center wixii kusaabsan Barteyaasha Luuqada Ingiriisiga, 614-466-4109, haddii aadan heli karin Bartaha Af Ingiriisiga Degmada ee dugsigaaga ama Isku-duwaha ESL.
- » Weydii sida aad ku heli kartid cunnooyinka cunuggaaga haddii dugsiyada bixinayo cunno iyo waqtiyada ama goobaha aanan u shaqeynin qoyskaaga.

**Haddii aad ka qabtid wax walaac ah waxbarashada cunuggaaga ama inaad dugsiga cunuggaaga macluumaadka kaga hesho luqaddaada koowaad inta lagu jiro ama ka dib xiritaanka COVID-19 awgiis, la xiriir Khadka Kaalmada Sharciga ah (Legal Aid Line) si aad u dalbato caawimaad sharci oo bilaash ah:**

WAC



KHADKA BILAASHKA AH

(888) 534-1432

KHADKA KAALMADA SHARCIGA



KAGA DALBO ONLAYN

[www.LegalAidLine.org](http://www.LegalAidLine.org)



Qareenada Xaquuqda Sharci ee Aasaasiga ah (Advocates for Basic Legal Equality, Inc. (ABLE)) iyo Kaalmada Sharci ee Galbeedka Ohio (Legal Aid of Western Ohio, Inc. (LAWO)) waa sharikado aan macaash doon ahayn oo u adeega baahiyaha sharciiyeed ee madaniga ah ee galbeedka Ohio ee shakhsiyaadka dakhligoodu hooseeyo iyo qoysaska. Macluumaadkaani ma ahan talo sharciiyeed. Waa macluumaad guud. Ma ahan mid lagu bedelay in aad kala hadasho qareen xaaladdaada. Waxaad wali uga baahantahay caawinaad qareen. Macluumaadkaani waa mid socda ilaa Mey 20, 2020, waana inaad ogaataa in macluumaadka ku saabsan sharciga cusub iyo tarjumadiisa ay wali is badbadalayso.

Advocates for Basic Legal Equality, Inc.

Legal Aid of Western Ohio, Inc.®